

Ma jirtaa dhibaato kaaga timid dhinaca milkiilaha gurigaaga? Waxaa laga yaabaa inaan ku caawin karno

Sidee ayuu Garsooruhu (Ombudsman) ii caawin karaa?

Garsooruhu (Ombudsman) wuxuu hab hufan oo bilaash ah ku xalliyaa dacwooyinka ka dhanka ah hay'adaha guryaha ee Adeegga ka diiwaangashan. Buug-yarahaan dhexdiisa waxaan hay'adahaas ku magacownay 'Milkiilayaal guryo' hase yeeshee waxaa soo gelaya maareeyayaasha, wakiillada iyo ciddii kale oo adeegga guryaha ku shaqo leh. Garsooraha (Ombudsman) waxaa la magacaabay iyadoo la raacayo sharciga dacwooyinka noocan ah loo soo saaray. Garsooruhu wuu ka madaxbannaan yahay milkiilayaasha guryaha, dawladda hoose, tan dhexe iyo dacwoodayaashaba. Sharciga ayaa dhigaya inuusan dhinacna u janjeersan – haddii aan si kale u dhigno, waa inuu hufan yahay oo dhexdhexaad yahay. Hawshiisu waa inuu aragtidiisa wax ku saleeyo, ee uusan taageerin ama u doodin dano cid gaar ahi wadato.

Adeegga waxaad uga dacwoon kartaa habka gurigaaga loo maamulo. Haddii aan ogaanno in milkiilaha gurigaagu uu kuu gefay waxaan soo saari karnaa amarro ama talooyin gefafkaas lagu saxayo. Haddii aan adeegga lagu fidiyo goldaloollo ku aragno waan soo dhexgeli karnaa si arrintaas wax looga qabto.

Ma bixinno 'xal isha baalkeeda ah' ama adeegyada gargaarka degdegga ah la xiriira. Ka hor inta aadan annaga noo imaan waa inaad, sida caadiga ah, soo martaa nidaamka dacwooyinka ee milkiilayaasha. Go'aammadayadu waxay noqon doonaan kuwo isu dheellitiran oo ku salaysan sida uu Garsooruhu u arko inay caddaaladda u dhowdahay.

Ururradee ayaa Adeegga xubno ka ah?

Waxaad xaq u leedahay inaad noo soo dacwootid haddii uu gurigaaga leeyahay ama maamulo urur Adeegga xubin ka ah ama aad ururrada noocaas ah guri ka codsatay. Sharciga ayaa dhigaya in dhammaan milkiilayaasha bulshada ee ka diiwaangashan England ay Adeegga xubno ka ahaadaan. Qaar ka mid ah milkiilayaasha guryaha gaarka ah ayaa iyaguna si iskood ah adeegga ugu soo biiray. Ururrada degmooyinku (Local councils) adeegga xubno kama aha. Haddaba wixii ururrada guryaha ee degmooyinka ku saabsan kala xiriir Garsooraha Dawladda Hoose (Local Government Ombudsman)

Waxaan kuu sheegi karnaa ururrada Adeegga xubnaha ka ah – fadlan nala soo xiriir.

Sidee ayaan u dacwoonayaa?

Haddii ay jirto dhibaato la xiriirta maamulka gurigaaga waa inaad marka hore raacdaa nidaamka dacwooyinka ee milkiilaha gurigaaga. Xafiisyada milkiilayaasha ayaad ka heli kartaa macluumaad dacwooyinkaas ku saabsan. Haddii aad macluumaadkaas ka weydid fadlan nala soo xiriir. inaad raacdid nidaamka dacwadda ee hay'adda dhexdeeda ah iyo in kale waa arrin aad adigu go'aankeeda iska leedahay. Waxaa suurogal ah inaan kaa caawinno sida loo dacwodo, hase yeeshee dacwadaada horay uma sii wadi karno, kaalin firfircoonka kama qaadan karno marxaladaan iyada ah.

Dacwadda aad milkiilaha guriga u qorataayi waxay milkiilaha siinaysaa fursad uu si toos ah dhibaatooyinka ugu xalliyoo oo uu u saxo qaladaadkii uu horay u galay. Habkaan ayaana dacwooyinka badankood lagu xalliyaa.

Haddii dhibaataada xal loo waayo waad nala soo xiriiri kartaa adigoo na weydiisanayaa macluumaad dheeraad ah ama foomka dacwada. Qof qaraabadaada ah, saaxiibkaa ama la taliye ayaad weydiisan kartaa inuu arrinta kaa caawiyo ama uu magacaaga ku dacwodo.

Buug-yarahaan waxaa kaloo la helaa isagoo luqado kale ku daabacan. Waxaan kaloo haynaa buug-yare iyo bog internet oo labaduba Ingiriisi ku qoran, kuwaasoo ku siinaya macluumaad dheeraad ah oo Adeegga ku saabsan iyo weliba sida loo dacwodo.



Housing
Ombudsman
Service

81 Aldwych – London WC2B 4HN

LoCall 0845 7125 973

Email info@housing-ombudsman.org.uk

Website www.housing-ombudsman.org.uk